Barnaamujka tallaalka ee iswidhishka

QAYB GUUD OO LOOGU TALO GALAY DHAMMAAN CARRUURTA

Dhammaan carruurta deggan waddanka Iswidhan waxay xaq u leeyihiin in laga tallaalo sagaalka cudurrada khatarta ah iyada oo laadeegsanayo daryeelka caafimaadka carruurta iyo dugsiyada

Weliba carrurta qaarkood ayaa lagu marti qaadayaa tallaalka cudurka beerka ku dhaca ee hepatit B, Tiibiida, hargebka iyo caabuqa ama cudurka loo yaqaan pneumokockinfektion. (eeg warqadda warbixinta ee gaarka ah).

Da'da	Sannad dugsi-yeedka	Tallaalka laga tallaalayo		
3 bilood		cudurka cumaha ku dhaca, cudurka teetanada, cudurka ama kixda xiiq dheerta, cudurka dabaysha ama qalalka, bakteeriyada Hib, iyo bakteeriyada pneumokocker	dooska 1	
5 bilood		cudurka cumaha ku dhaca, cudurka teetanada, cudurka ama kixda xiiq dheerta, cudurka dabaysha ama qalalka, bakteeriyada Hib, iyo bakteeriyada pneumokocker	dooska 2	
12 bilood		cudurka cumaha ku dhaca, cudurka teetanada, cudurka ama kixda xiiq dheerta, cudurka dabaysha ama qalalka, bakteeriyada Hib, iyo bakteeriyada pneumokocker	dooska 3	
18 bilood		cudurka jadeecada, cudurka dhabannada barariya, cudurka finanka yar-yar leh		dooska 1
5-6 sano		cudurka cumaha ku dhaca, cudurka teetanada, cudurka ama kixda xiiq dheerta, cudurka dabaysha ama qalalka	dooska 4	
6-8 sano	1–2	cudurka jadeecada, cudurka dhabannada barariya, cudurka finanka yar-yar leh		dooska 2
14-16	8–9	cudurka cumaha ku dhaca, cudurka teetano, cudurka kixda ama xiiq dheerta	dooska 5	

Daryeelka caafimaadka carruurta

Daryeelka caafimaadka ee dugsiga

Carruurta dhalatay ilaa 2001 waxay raacayaan jedwel kale laga bilaabo 5-6 sano jirka

Da'da	Sannad dugsi-yeedka	Tallaalka laga tallaalayo		
5-6 sano		cudurka dabaysha ama qalalka	dooska 4	
10 sano	4	cudurka cumaha ku dhaca, cudurka teet-anada, cudurka kixda ama xiiq dheerta	dooska 4	
12 sano	6	cudurka jadeecda, cudurka dhabannada barariya, cudurka finanka yar-yar leh		dooska 2

Maxaa looga jeeda tallaalka?

Tallaalka micinihiisu waxa weeyi in jidhka lagu mudey qaybo ka mid ah maaddada la qaado ee sobob u noqota cudurka, ama maaddada la qaado dhammaanteed iyada oo hab daciif ah. Arrintu kuma koobna oo qudha in qofku uu bukoodo oo keliya, ee laakiin waxa ku filan in la sameeyo ka hortag ama badbaado. Haddii qofku waa dambe uu qaado oo la qabadsiiyo, kolkaa dheecaanka daafaca ee jidhka ayaa diyaar garoobaya oo shaqaynaya isla markaana maaddada cudurka sidda ee la qaadayo ka baabiinaya waxyeellada inta cudurku aanu dilaacin. Tallaalka waxa la sameeyaa iyada oo la adeegsanayo irbad qofka lagu mudo.

Faa'idooyinka tallaalku waxaa weeyi ka hortagga ama ilaalinta cudurrada iyo dhibaatooyinka joogtada ah ee ay keenaan. Khasaarahooduna waa xanuunka tallaalka naf'ahaantiisu uu keenayo marka qofka la irbadda lagu mudayo iyo weliba khtarta ka iman karta dhibaato ay keeni karaan. Ma jirto dawo ama daaweyn sideedaba khatar ka madax bannaan. Kolkaa maamulka caafimaadka ayaa qiimaynaya in khtarta cudurku ay si weyn uga weyn tahay khatarta tallaalka naf'ahaantiisa ka iman karta.

Ma jirto wax shuruud ah ah oo lagu xidhayo oo khasab lagaga dhigayo tallaalka, laakiin adigaaga waalidka ah ayaa go'aaminaya haddii ilmahaaga la tallaalayo. Si foojigan ugu fiirso tallaalka ilmahaaga laga tallaalay Tiibiida adoo eegaya kaadhka –Rugta Xannaanada Carruurta ama ama haddii si kale loo tallaalay.

Tallaalku muxuu ka hortagayaa, ama waa maxay bedbaadada uu keenayaa?

Tallaalku ma dammaanad qaadayo in dhammaan dadkii la tallaalay badbaadsan yihiin. Carruurta aan iyagga aan tallaalka lagu badbaadinayn, ayaa haddana qayb badani cudurrda ka badbaadsan tahay, iyada oo ay tahay in dhammaan carruurta Iswidhan joogta la tallaalayo. Cudur lays qaadsiiyo oo markaa jira yaa si deg deg ah waxa lagu joojinkaraa iyada oo dhammaan carruurtu ay haystaAn ka hortag ama badbaado shaqaynaysa.

Tallaalada carruurta la tallaalo ee ka hortagga cudurrada cumaha, cudurka teetanada, kixda ama xiiq dheerta, dabaysha ama qalalka, fayrsaska ama cudurka-Hib iyo bakteeriyada cudurka pneumockock ayaa waxa wada jir ahaan loogu siiyaa sidii ka hortag ama badbaado gun dhig ah. Tallaalka kolkaa xiga marka ilmuhu uu yahay da'da 12 bilood waa (dos) cusbooneysiin ah oo dheeraynaya muddeda ka hortagga ama ka badbaadinta cudurka. Dosas kale oo weliba dheeraad ah oo ah ka hortagga cudurrada dabaysha, cudurka cumaha, dabaysha ama qalalka, kixda ama xiiq dheerta ayaa la siiyaa carruurta waa dambe. Tallaal kale oo dheeraad ah oo ah ka hortagga fayraska-Hib iyo bakteeiyada pneumkocker kolkaa looma baahna.

Dos ama in kale oo oo la raaciyo oo ah tallaalka cudurrada, jadeecada, cudurka dhabannada iyo cudurka finanka yar yar leh ayaa waxay keenayaa ka hortag ama badbaado fiican. Dos ama in kale ayaa carruurta ma dambe lagu siiyaa dugsiga, waa marka koowaad eh si loo qabto kuwa aan keenin ka hortag ama badbaado tallaalkii ugu horreeyey, waa marka labaad eh si loo sugo badbaado ama ka hortag muddo dheer ah.

Waa kuwee cudurrada ku jira borogaraamku?

CUDURKA CUMAHA KU DHACA waa cudur halis ah oo Cumaha ku dhaca oo aad loo kala qaado, kaas oo carruurta neef qabatow ku keeni kara. Bakteeriyada cudurka difteri waxay noqon kartaa sun keeni karta dhaawcyo nolosha khatar ku ah, sida wadnaha, kelyaha iyo habka xiddidada neerfaha.

CUDURKA TEETANADA waxa keena bakeeriyo ku jirta dhulka oo waxyeli karta nabar. Bakteeriyadu waxay soo saartaa sun adag oo keeni karta qallal ba'an iyo neefqabatow, badanaana annu qofku ka bixi karin. Cudurkan laysma qabadsiiyo. Welibana dadku iskuma gudbin karaan.

CUDURKA KIXDA AMA XIIQ DHEERTA waa cudur la kala qaado oo dhuumaha hawo mareenka ku dhaca oo qofka qufac adag ku weerara, qufacaas oo socon kara bilooyin badan keeninina kara cudurro joogta ah, oo ku yimaadda sida cudurrada sombobada. Cudurkaasi ilmaha carruurta ah wuxu ku noqon karaa mid adag oo xitaa noloshiisa khatar gelin kara.

CUDURKA DABAYSHA AMA QALALKA (curyaamidda carruurta) waa cudur uu fayras keeno oo qashinka iyo biyaha waskhda ahi ay fidiyaan. Waa hore dad badan ayaa ku dhintay ama ku curyaamay ama ku dhaawacmay xagga nolosha cudurka dabaysha ama qallaka awgii waddan Iswidhan. Cudurka dabaysha ama qallaku wuxuu ka jiraa uun waddamo tiro yar oo ka mid ah Africa iyo Aasiya.

FAYRASKA -HIB waa bakteeriyo keeni karta caabuq ama cudurro badan oo halis ah, ugu horraynna xagga carruurta da'doodu ka hoosayso shan jirka. Khatarta ah cudur halis ah oo ku dhaca maskaxda iyo dhiigga oo sumoobaa waa boqolkiiba shan ilaa toban, dadka ka kaca ee ka badbaadaana waxa ku dhici karta dhaawac xagga dhago la'aanta ah ama qallal degdeg ah.

FAYRASKA PNEUMOKOCKER waa bakteeriyo keeni karta cudurro fudud sida dhegaha iyo sanqada oo caabuq ku dhaco, laakiin waxay keeni karaan weliba cudurro khatar ah oo nolosha qofka halis gelin kara, sida dhiigga oo sumooba iyo maskaxda oo cudur ku dhaco. Waxa jirta tusaale ahaan khatar ah, dhaawac xagga dhegaha ah ama noocyo kala duwen oo ah dhaawac xagga maskaxda ah. Tallaalku wuxuu keenaa ka hortagga bakteeriyada badanaa caadiga ku ah carruurta yar-yar, taas oo qiyaastii u dhiganta ka hortag ama daafac boqolkiiba 70 ah.

CUDURKA JADEECADA waa cudur aad loo kala qaado oo dhib badn leh, waana cudur uu fayras keeno oo leh xummad sare, qufac iyo finan cun cuna. Cudurka jadeecadu wuxuu keeni kartaa cudurro badan, sida cudurro ku dhaca maskaxda, dhegaha iyo dhuumaha hawo mareenka. Ma jirto wax daawo ah oo cudurka naf'ahaantiisa lagu daweeyaa, carruurta aan la tallaalinna qaarkood ayaa ku dhinta.

CUDURKA DHABANNADA BARARIYA waa cudur fayras keeno oo la kala qaado oo ku dhaca qandhjidhadda candhuufta iyo habka neerfaha ee dhexe. Cudur caadi ah oo lagu yaqaannnaa waxa weeyi maskaxda oo caabuq ama cudur uu ku dhaco, taas oo keeni karta dhaawac xagga maqalka ah ama dhago la'aanbba. Innamada bukooda waxa xanuuni kara xiniinyha ama dhikilaha, taas oo marmar iyo dhif ma dhalaysnimo ku keeni karta.

CUDURKA FINANKA YAR-YAR LEH caadi ahaan waa cudur uu fayras keeno oo ku dhaca carruurta iyo dadka waaweynba, laakiin haddii uu ku dhaco haweenay uur lah waxa jirta khatar ah in ilmaha uur jiifka ah ay dhaawacyo khtar ahi ka soo gaadhaan xagga maskaxda, wadnaha, aragga iyo maqalka.

Waa kuwee tallaalada ku jira borogaraamku?

- Ka hortagga cudurka cumaha ku dhaca, cudurka teetanada, kixda ama xiiq dheerta, cudurka dabaysha iyo fayraska ama cudurka-Hib waxa la siiyaa tallaallo wada socda.
- Tallaalka ka hortagga jadeecada, cudurka dhabannada barariya iyo cudurka finanka yar-yar leh waxa la siiyaa tallaallo wada socda.
- Tallaalka fayraska ama cudurka pneumokockinfektion waxa la siiyaa tallaal gaar ah.

Tallaalada wada socdaa waxay u shaqeeyaan si fiican oo la mid ah sida tallaalada gaarka ah, mana jrto sobob faa'iido ku jirta oo tallaalada loogu kala qaybiyaa. La xidhiidha rugta xannaanada carruurta ama daryeelka caafimaadka ee dugsiga si aad uga hesho warbixin ku saabsan tallaalada halkaas laga isticmaalo.

Waa kuwee dhibaatooyinka yimaadda ama soo baxaa?

Carruurta intooda badan wax dhibaato ahi kuma timaaddo ama wac sidaas aan u weyneyn ayaa ka yimaadda tallaallada. Dhibaatooyinka yimaaddaa badanaa waxay caadi ahaan iskaga dhammaadaan muddo dhowr maalmood ah. Haddii laga shikiyo ama ilmuhu uu xanuunsado waa in aad la xidhiidhaa rugta xannaanada carruurta, daryeelka caafimaadka dugsiyada ama daryeelka caafimaadka.

Tallaalka ka hortagga cudurka cumaha ku dhaca, teetanada, kixda ama xiiqdheerta, dabaysha ama qallalka, Fayrasyada Hib iyo pneumokocker

CAADI AHAAN (waxa lagu arkaa ugu yaraan 100kiiba 1 dadka la tallaalay):casaan, barar iyo damqasho meeshii qofka laga mudey, xummad fudud, shuban, matag.

WAXAAN CAADI AHAYN AMA WAXYAABO MAR-MAR IYO DHIF AH (ILMAHA MUUJADA AH): oohin aan la sasabi karin saacado badan gudahooda, xummad gaadha ama kor u dhaafta 39 Ċ, barar xooggan /casaan, xummad, kala daadsanaan ama finan yaryar.

WAXAAN CAADI AHAYN AMA WAXYAABO MAR-MAR IYO DHIF AH (CARRUURTA WAAWEYN): oohin aan la sasabi karin saacado badan gudahooda, xummad gaadha ama kor u dhaafta 39 Ċ, barar xooggan /casaan, xummad, fal xasaasiyad ah (jidhka oo wax diida).

Tallaalka ka hortagga jadeecada, cudurka dhabannada bararriya, iyo cudurka finanka yar-yar leh

CADI AHAAN (waxa lagu arkaa ugu yaraan 100kiiba 1 dadka la tallaalay): casaan, barar iyo damqasho meeshii qofka laga tallaalay. Fal la mid ah mid ka yara fudud sida cuduurada oo kale. Caadi ahaan waa xummad iyo finan 1-2 toddobaad tallaalka ka dib. Carruurtu ma qaadaan xanuunkuna wuxu ku dhammaadaa dhowr habeen iyo maalmood. Tallaalka labaad ka dib wax sidaas ah jidhka qofka kuma timaaddo.

WAXAAN CAADI AHAYN AMA WAXYAABO MAR-MAR IYO DHIF AH: xubno xanuun fudud oo iska dhammaada, xummad, fal xasaasiyad ah (jidhka oo wax diida)

Wax ay tahay in laga fikiro marka waddamada dibedda loo socdaalayo

Ka hor socdaalka lagu tagayo waddamada dibedda, waxa loo baahan karaa wax tallaal ah oo hore laysku tallaalo iyo tallaallo kale oo kolkaal loo baahdo. La tasho rugta xannaanada carruurta ama rugta qaabbilaadda tallaalka.

Miyaad dooneysaa warbixin dheeraad ah?

Waxaad marka hore la xidhiidhaa rugta daryeelka caafimaadka ama rugta daryeelka caafimaadka ee dugsiga haddii ilmahaagu uu dugsiga bilaabo.

MUHIIM!

Tallaalka ka hor – Uga warran haddii ilmahaagu u xasaasiyad ku yeeshay ama si aan caadi ahayn uu jidhkiisu u diidey tallaaladii hore.

Tallaalka ka dib – La xidhiidh rugta daryeelka caafimaadka ee carruurta ama daryeelka caafimaadka dugsiyada haddii ilmahaaga aad ku aragto wax aan caadi ahayn xilliyadii ugu dambeeyey.

Socialstyrelsen
MARS 2009 ART. NR. 2009-126-55